



Nabigu scw markuu tago gogoshiisa habeen walba wuu isku qaban jirey labadiisa sacab, wuxuu ku akhrin jiray kuna tufi jiray: { قل هو الله أحد }, iyo { قل أعوذ بربّ الفلق }, iyo { قل أعوذ بربّ الناس }

Caa'isha Allaha ka raali noqde waxaa laga wariyey: Nabigu scw markuu tago gogoshiisa habeen walba wuu isku qaban jirey labadiisa sacab, wuxuu ku akhrin jiray kuna tufi jiray: { قل هو الله أحد }, iyo { قل أعوذ بربّ الفلق }, iyo { قل أعوذ بربّ الناس }, ka dibna ku masixi jiray inta uu ka gaaro jirkiisa, isagoo ka bilaabaya madaxa iyo wajigiisa iyo inta soo qaabisha jirkiisa, saddex jeer buu samayn jiray.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabiga dhaqankiisa waxaa mid ahaa markuu tago gogoshiisa si uu u seexo wuxuu isku qaban jiray labadiisa sacab isago kor u qaadaya sida qofka ducaysanaya si khafiifa ayuu ugu tufi jiray afkiisa candhuufo yar, wuxuuna ku akhriyi jiray saddexda suuradood ee: { قل هو الله أحد } iyo { قل أعوذ بربّ الفلق } iyo { قل أعوذ بربّ الناس }, ka dibna wuxuu ku masixi jiray labadiisa sacab inta uu gaaro ee jirkiisa ah, isagoo ku bilaabaya madaxa iyo wajigiisa iyo soo jeedkiisa, wuuna ku celcelin jiray ficilkaa saddex jeer.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65060>

